


Maarso 18, 2024

Gacaliyayasha Mulkiilayaasha Hantida,

Waxaan u qoreynaa si aan u bixinno macluumaadka ku saabsan Mashruuca Dayactirka Jid lugeedka 2023. Noofambar 14, 2022, Golaha Magaaladu waxa uu qaatay siyaasada Degmada ee Hagaajinta Jid lugeedka (SID) si loo maamulo mashaaricda beddelka iyo dayactirka ee sannadlaha ah ee magaalada..

Barnaamijka SID wuxuu qeexayaa degmooyinka qiimaha dayactirka tas-hiilaadka dadka lugaynaya ay ku baahsan yihiin dhammaan xirmadaha iyadoo lagu saleynayo kala-soocidda hantida ma-guurtada ah. Sida ku cad barnaamijka cusub, dhammaan dadka deggan Rochester waxay taageerayaan kharashka la socon karo bulshada



Wax badan ka baro “online”.

Macluumaadkan waxaa laga heli karaa khadka isagoo Soomaali ku qoran.

Esta información está disponible en línea en español.

Maxay tani adiga kula tahay?

1. Adigu hadda kaligaa mas'uul kama tihid bixinta iyo isku dubaridka dayactirka jid lugeeyada xiga gurigaaga.
2. Dhammaan mulkiilayaasha guryaha ee degmada, xitaa kuwa aan lahayn jid lugeed dhinaceeda ah, ayaa bixin doona khidmad sanadle ah si ay u daboosho kharashka dayactirka jid lugeedka ee degmada. (Shaxda kharashka ayaa hoos ku yaal.)
3. Mashruuc jid lugeed ayaa ka dhici doona degmadaada 5tii sanaba mar. Jid lugeed kasta oo degmada ku taal ayaa la eegi doonaa ugu yaraan 20-kii sanaba mar.

Maxaad u helaysaa warqaddan?

Waxaad ku leedahay ugu yaraan hal guri degmada SW-5 tanina waa meesha diiradda la saarayo xilliga dhismaha ee 2024. Inta badan beddelka iyo dayactirka jid lugeedka waxay ka dhici doonaan Aagga Mashruuca 5-1 (eeg macluumaadka raacsan). Mashruuc jid lugeedka ayaa ka dhici doona degmada SW-5 5tii sanaba mar (Mashruuca Aagga 5-2 ee 2029, Mashruuca Aagga 5-3 ee 2034, Mashruuca Aagga 5-4 ee 2039, Mashruuca Aagga 5-1 ee 2044, iwm.).

Intee in le'eg ayaan ku biirin karaa barnaamijka SID?

Dayactirka/hagaajinta jid lugeedka iyo Sharciga Naafada Ameerikaanka (ADA) ee horumarinta Mashruuca aagga 5-1 waxay keeni doontaa in lagu qiyaaso \$2,935,183 maalgelin lagu sameeyo tas-hiilaadka dadka lugaynaya ee Degmada SW-5 sanadka 2024.

U qaybinta miisaaniyadan la qiyaasay si waafaqsan siyaasadda (<https://qr1.be/P9JM>) waxay

Sii socota...

keenaysaa qiyaasahan soo socda:

Nooca xirmadda	Kharashka xirmadda Sannadlaha ah
Degaan aan lahayn tas-hiilaadka dadka lugeynaya	\$34.61
Deegaan leh tas-hiilaadka dadka lugeynaya	\$67.21
Aan la deganayn oo aan lahayn tas-hiilaadka dadka lugaynaya	\$197.63
Aan la deganayn oo leh tas-hiilaadka dadka lugaynaya	\$393.26

qoraalada khidmadaha:

- Guryaha ilaa iyo ay ku jiraan saddex qaybood (3-plexes) ayaa loo tixgaliyaa xirmooyinka "Residential" ee shaxda kore. Guryaha leh afar ama in ka badan ayaa lagu daray nooca xirmada "aan la deganayn" oo leh xirmo ganacsi, xirmo warshadeed, iwm. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan Qeybaha SID waxaa laga heli karaa www.qr1.be/P9JM.
- Xirmadaha dhismahooda jid lugeedka ee dhawaa 5-tii sano ee la soo dhaafay iyo diiwaanka magaalada laguma qiimeyn doono 5-ta sano ee ugu horeysa ee barnaamijka SID.
- Kuwa aan lahayn tas-hiilaadka dadka lugaynaya ee ku jira xirmooyinkooda waxay bixin doonaan 50% qiimayaasha lagu xisaabiyay nooca xirmada.
- 2024 khidmadaha SID waxa lagu qaadi doonaa cashuuraha guryaha muddo shan sano ah, laga bilaabo 2025-2029. Khidmadaha cusub ee SID ee Degmada SW-5 ayaa la qaadi doonaa 2030-2035 iyo wareeg kasta oo shan sano ah kadib.

Miisaaniyadda mashruuca iyo khidmadaha SID ee kor ku xusan waxay ku salaysan yihiin qiyaasaha Hawlaha Guud. Goluhu waxa uu tixgalin doonaa Hagaajinta Jid lugeedka Degmada 2024 iyo bixinta qandaraaska dhismaha in uu si rasmi ah u qaato Shirka Golaha Magaalada ee Abriil 8, 2024. **Warqadani waxay u adeegtaa sida Ogeysiinta Fallooyinka Dadweynaha ee kulanka Abriil 8.** Qof kasta oo raba inuu wax ka sheego mashruucan waa lagu soo dhawaynayaa inuu hadlo inta lagu jiro Muddada Faallooyinka Furan ee kulankaan.

Khidmadaha dhabta ah waxay ku salaysnaan doonaan qandaraaska dhismaha ee ay bixiyaan Golaha Deegaanka Abriil 8. Kharashyada la ansixiyay waxaa lagu soo dhejin doonaa "online" ee rochestermn.gov/sidewalks.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijkan ayaa laga heli karaa rochestermn.gov/sidewalks. Ilaha waxaa ka mid ah muuqaal (video) waxbarasho iyo Su'aalaha Inta badan la Isweydiyo. Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa Hawlaha Guud si ay kuu caawiyaan.

Si xushmad leh,

Tyler Spies
Hawlaha Guud ee Magaalada Rochester
Maareeyaha Mashruuca Qaybta Injineerinka
(507) 328-2466 or tspies@rochestermn.gov

